## Qoraal kooban

Natalia Skogberg, Päivikki Koponen, Eero Lilja, Sara Austero, Tyler Prinkey, Anu E. Castaneda. Impact of Covid-19 on the health and wellbeing of persons who migrated to Finland. The MigCOVID Survey 2020–2021. [Saamaynta dhinacyada caafimaadka iyo nololwanaagga ee uu cudurka safmarka Covid-19- ku leeyahay dadka u soo guuray Finland. Cilmibaarista-MigCOVID 2020–2021.] Warbixinta 8/2021. Helsinki, Suomi 2021. ISBN978-952-343-682-4 (waa la daabacay); ISBN978-952-343-683-1 (ku baahinta internetka).

Cudurka safmarka Covid-19- iyo xadaymihii la xiriiray, waxaa ay saamayn weyn ku yeesheen caafimaadka dadweynaha. Saamayntaasi waxaa ay si xoog ah ugu dhacday dadka, iyagu awalba kahor cudurkaan safmarka Covid-19 bulshada dhexdeeda ka ahaa dabaqadda itaalka daran. Hadafka laga leeyahay cilmibaaristaan waa sidii loo caddayn lahaa, saamaynta uu cudurkan safmarka ah ee Covid-19 ku leeyahay nololmaalmeedka, caafimaadka, nololwaanaagga dhanka caafimaadka maskaxda iyo tayada nololeed ee dadka u soo guuray dalkaan Finland.

Cilmibaaristaan waxaa loo adeegsaday maadada cilmibaarista-(MigCOVID) ee saamaynta cudurka safmarka korona uu ku leeyahay dadka ku dhashay waddanka dibaddiisa, taasoo ay soo saaratay Hay’adda Caafimaadka iyo Nololwanaagga ee dalkaan Finland. – Waxaa maadada cilmibaaristaan la soo uruuriyay intii u dhexeysay bishii Oktoobar 2020-kii illaa iyo bishii feberaayo 2021-kii, xilligaasoo ahayd markii ay mowjada labaad ee cudurka safmarka Covid-19 ka bilaabatay Finland. Wadarta guud tiro gaaraysa 3 668 qof oo da’doodu u dhexeyso 20–66- ayaa ka qaybqaatay cilmibaarista MigCOVID. Ka qaybqaadashada cilmibaarista waxaa ay ahayd 60 %. Cilmaabirtaan markii la samaynaayay waxaa loo barbardhigay cilmibaaris lagu sameeyay mashruuca FinTerveys 2021 ee Hay’adda Caafimaadka iyo Nololwanaagga, taasoo lagu sameeyay dad u dhashay dalkaan Finland (qiyaastii 3 490 ayaa ka qaybqaatay, boqlelleey ahaan tirada ka qaybgalaaysha waxay ahayd 51 %).

Istaatiistiko ahaan kala duwanaanshaha weyn ee dadwenaha oo dhan u dhexeeyay ee la arkay wuxuu ahaa, in tirada ugu badan ee dadka u soo guuray dalkaan Finland uu hayay welwel weyn oo la xiriira cudurka safmarka ah ee Covid-19. Welwelku wuxuu la xiriiray qaadista ama faafista cudurka safmarka ah ee Covid-19- (dadweynaha oo dhan 18 % waxaana ka soo horjeeda 29 % oo ahayd tirada dadka waddankaan u soo guuray), in cudurka qof kale la qaadsiiyo (31 % dhanka kalena 39 %), in cudurka uu qaado qof ehelka ah (40 % dhanka kalena 52 %), takoorid ama quursi lagula kacay qofka, cudurka safmarka ee Covid-19 awgiis (7 % dhanka kalena 16 %), sii socoshada shaqada (8 % dhanka kalena 30 %), qaabka ay golaha wasiirradu u maareeynayaan dhibaatada cudurka (14 % dhanka kalena 25 %), awoodda daryeelka caafimaadka ee la xiriirta daryeelidda dhammaan bukaanka oo dhan (15 % dhanka kalena 29 %).

Marka loo barbardhigo tirada dadweynaha oo dhan, si weyn oo muuqata ayay qayb ahaan dadka waddanka u soo guurey u sheegeen, in ay hoos u dhacday rajadooda la xiriirta mustaqbalka (dadweynaha oo dhan 30 % dhanka ka soo horjeeda, dadka u soo guuray waddanka 38 %) sidoo kale so kordhidda khibradaha shakhsi ahaaneed (28 % dhanka kalena 36 %), dhibaatada hurdada (10 % dhanka kalena. 18 %) iyo sigaar cabbista (2 % dhanka kalena 4 %). Dadka u soo guuray waddankaan Finland 9 % waxaa ay sheegeen hoos u dhac dhanka ammaanka guriga ah iyo 39 % oo dhanka dhaqdhaqaaqa jirka ah. Istaatiistiko ahaan waxaa la arkay farqi weyn oo muuqda oo ku saabsan dhanka hoos u dhaca xaaladda dhaqaale ee dadka warbixinta soo gudbiyay (tirada guud ee dadweynaha 6 % dhanka kalena, dadka u soo guuray Finland 23 %). Qaar kale oo dadka ka mid ah cudurka safmarka ah ee Covid-19-, wuxuu ku lahaa saamayn wanaagsan. Marka loo

barbardhigo dadka oo dhan, dadka u soo guuray waddankaan waxaa ay badankood sheegeen in wada xiriirka saaxiibbada uu kordhay (dadweynaha oo dhan 7 % dhanka kale ee dadka waddankaan u soo guurayna 16 %), sidoo kale rajada laga qabo mustaqblka (7 %dhanka kalena 20 %) iyo hoos u dhaca kelinnimada (2 % dhanka kalena 6 %), ismaandhaafka qoyska dhexdiisa (3 % dhanka kalena 6 %), sidoo kale cunista raashinka fudud (5 % dhanka kalena 9 %).

Wadarta guud 15 % dadka waddankaan Finland u soo guuray ayaa sheegay in xilligii cudurka safmarka ah ee Covid-19, lagula dhaqmay qaab ixtiraam darro ah, aflagaaddo, hanjabaad ama qashqashaad leh. Dadkaas loola dhaqmay sida ixtiraam darrada ah ee ka duwan tan dadka kale (11 % dhammaan dadka la baaray), 46 % waxaa ay sheegeen in arrinkaan uu ahaa mid dhacaayay toddobaad walba. Dadkaas, qayb ahaan kuwa la caayay ama si kale oo hadal ahaan ah loogu xadgudbay waa (7 %), tiro gaaraysa 35 % waxaa ay sheegeen in arrinkaan ay la kulmaayeen ugu yaraan toddobaad walba. Hanjabaadda iyo qashqashaadda waxaa sheegay 5 % dadkii la baaray. Dadkaas 24 % waxaa ay sheegeen in arrinkaan uu dhacaayay ugu yaraan toodobaad walba.

Wadarta guud 81 % dadka u soo guuray waddankaan iyo 84 % dadweynaha oo dhan, waxaa ay sheegeen in ay leeyihiin awood shaqo. Istaatiistiko ahaan waxaa farqi weyn uu ka muuqday marka la isbarardhigo aragtida dadweynaha oo dhan ee dhinacyada awoodda waxqabad iyo qaybaha kale ee nololwanaagga. Marka loo eego dadweynaha oo dhan, waxaa dadka waddanka u soo guuray ay sheegeen in si dhif ah ay u dareemayaan in caafimaadkoodu wanaagsan yahay /illaa xad uu wanaagsan yahay (dadweynaha oo dhan 80 % dhanka kale ee dadka waddankaan u soo guureyna waa 70 %), xusuusta in ay si fiican ama si aad iyo aad u fiican u shaqaynayso (82 % dhanka kalena waa 75 %) sidoo kale tayada nololeed si aad iyo aad u fiican ama si fiican (78 % dhanka kalena waa 70 %), marka laga hadlo dhanka culayska caafimaadka maskaxda (11 % dhanka kalena waa 20 %), xadaymaha aadka u adag ee waxqabadka (5 % dhanka kalena waa 11 %), dhacdooyinku waxaa ay ahaayeen kuwo aad u sarreeya marka loo barbardhigo dadweynaha oo dhan.

Saamaynta uu cudurka safmarka ah ee Covid-19 ku leeyahay caafimaadka iyo nololwaanaagga, waxaa uu ahaa mid si weyn uga muuqda dadka waddankaan u soo guuray, gaar ahaan qaar ka mid ah qaybaha caafimaadka iyo nololwanaagga, marka loo barbardhigo dadweynaha oo dhan. Cilmibaarisyada mustaqbalka la samayn doono waa in lagu caddeeyaa xiriirika ka dhexeeya saamaynta waxyaabaha dahsoon iyo arrinka ah in saamaynta xun ee cudurka safmarka Covid-19, ay tahay mid ku badan kooxaha qaarkood. Sidoo kale saamaynta wanaagsan ee cudurka safmarka Covid-19 ee la arkay, waa in laga baaraa dhinaca ah qaabka looga gudbay dhibaatadaas.

Ereyada muhiimka ah ama furaha ah: Covid-19; Feyruska korona; MigCOVID; Waddanka u soo guuray; caafimaadka; Caafimaadka maskaxda; Nololwanaagga; Takoorka; awoodda waxqabad: welwelka; nolosha maalinlaha ah; tayada nololeed.